# Maaddada Af Soomaaliga ee Dugsiyada: Dhaliilaha Jira iyo Dhabbaha Xalraadinta

**W.Q. Mustafa Fayruus**

**Feb 21, 2024**

---

In lagu anqariyay *'Af Soomaali',* kuna dhex koray bulshadiisii iyo dhulkiisii hooyo ka sokow, waxa muddadii laba iyo tobanka sanno ahayd ee uu dugsiga ku jiray uu si joogto ah u soo dhigtay *'Maaddada Af Soomaaliga'*; haddana ma qori karo dhowr sadar oo aan lahayn dhaliil foolxun!! Kaasi waa ardaygii ka soo baxay dugsiga sare.

Qoraallada rasmiga ah ee ka soo baxa xafiisyada sare ee maamulka (wasaarad, shirkad iwm) waxaad ku arkaysaa khaladaad ah dhinacyada higgaadda, xarfaha labalaabma, adeegsiga astaamaha qoraalka (joogsiga, hakadka iwm), taxnaanta erayada iyo khaladaad kaleba. Qoraalladan waxaa diyaariya xirfadlayaal la soo xulay, kuna mushaar qaata xirfaddooda qoraalka.[1][i]

Dhinaca akhriska, waxaa dhacda inaan aragno mas'uul sare, aqoonna lagu og yahay, oo marka uu fagaare ka khudbaynayo ay ku adag tahay akhrinta hadal ama khudbad u qoran. Markuu dhowr jeer ku margadana ay dantu baddo inuu warqaddana dhinac isaga riixo, oo golekafuul miciin bido!

Dabcan, ardaygaa dugsiga sare ka soo baxay ee qoraalku dhibayo, xirfadlahaa xafiiska jooga ee qoraalka aan saxayn iyo masuulkaa akhrisku ku culus yahay, intaba af Soomaaligu waa afkoodii hooyo, shakina kuma jiro in ay si fiican u yaqaannaan, si fiican oo xarrago leh ayay ugu hadlaan, una fahmaan. Sidaas darteed, dhaliishu maaha aqoontooda af Soomaaliga oo liidata ee waa xirfaddooda qoraalka iyo akhriska oo aan dhisnayn. Waa shaqadii dugsiyada aasaasiga iyo sare loo igmaday.

Tolow xaggee dhaliishu ka jiraa?!

Af Soomaaligu waa maaddo lagu dhigto dugsiyada Soomaalida heerarkooda hoose, dhexe iyo sare intaba. Dugsiyada hoose/dhexe, waxaa la dhigaa 2-4 xiisadood, dugsiga sarena 1-2 xiisadood toddobaadkiiba. Haddaba, maxay u liidataa xirfadda qoraalka iyo akhriska Soomaaliga ee ardaygani? Xaggee ayuu biyadays ka leeyahay dadaalkani?!

Kama hadlayno luqadda waxbarashada ama afka ay ku baxaan maaddooyinka kala duwan, ama *‘medium of instruction’*, ee waxaan ka hadlaynaa *‘Maaddada Af Soomaaliga’* ee maaddo ahaan loo dhigo min sannadka 1aad ee dugsiga hoose ilaa sannadka 12aad ee dugsiga sare.

Ardaygan afkiisa hooyo sida fiican ugu hadli kara, una fahmi kara, maxaa sababay in 12 sanno lagu dhisi kari waayo xirfaddiisa akhriska iyo qoraalka?! Maba yara sannadaha iyo saacadaha galay, ee xaaggee dhaliishu ka jirtaa? Xaggee ayuu dadaalkani biyadays ka leeyahay?! Waa su`aal innooga baahan jawaabteeda. Helidda jawaabtaa ayaa fure u noqon karta dhabbaha xalka.

Maqaalkani waa faallo kooban oo aan arrintan ku falanqaynayo, oo aan maagganahay inay noqoto qoraal intan ka faahfaahsan. Aan afeef dhigtee, ujeeddada faalladani maaha eedayn iyo calaacal midna. Ujeedadu waa gorfaynta xaaladda taagan iyo dhiraandhirinta talooyin furdaamin u noqon kara dhaliilaha jira.[ii] Tan kale, faalladaydan iyo dhaliilaha aan tilmaamayo ama talooyinka lagu horumarinayo midkoona uma banbaxayo heerka dugsiga hoose, waxay ku saabsan yihiin heerarka dugsiyada dhexe iyo sare, oo ah sannadada min 5aad ilaa 12aad.

Sida muuqata, *‘Maaddada Af Soomaaliga’* ardayga waa loo dhigaa oo ma maqna, haddana dheeftii laga sugayay lagama hayo! Sidaas darteed, waa inaan farta ku fiiqno meelaha biyadayska ama dhaliishu ka jirto, si wax looga qabto; dadaalka maaddadan la geliyaana u noqdo mid natiijo loo aayo dhala, faa’iidadiisana laga arko ardayga.

## 1. Dhaliilaha Jira

Dhowr sanno horteed daraasad aan sameeyay, waxay tilmaantay in biyadays iyo dhaliilo dhumuc leh ay ka jiraan dhinacyada muqararka, macallinka maaddada dhiga iyo agabka waxbarashada ee la adeegsanayo intaba.[iii] Dhaliilahan aan si kooban mid mid isu dul taagno, oo u iftiimiyo.

### 1. 1 Muqarar Dheellisan

Ugu horeynba, dheelli ayaa ka muuqda hannaanka loo abbaaro maaddadan. Sida muuqata, waxaa loo qaatay in maaddada af Soomaaliga dulucda laga leeyahay ay tahay in ardayga la baro ‘Suugaan’, lana xafidsiiyo tiro badan oo gabayo ah. Tani waxay ka muuqataa buugga muqararka maaddadan; waxaa kale oo ay ka muuqataa sida loo soo xulo macallinka dhigaya; waxaa kale oo ay ka muuqataa casharrada uu macallinku mudnaanta siiyo; waxa kale oo ay ka muuqataa maxsuulka uu sito ardayga soo qalinjebiyay. Intuba falagga ‘suugaan’ ayay ku wareegayaan!

Muqararka af Soomaaliga waxaa ku badan suugaanta, siiba tixda, waxaana ku yar xirfadaha afka iyo adeegsigiisa. Dhaliishani waa mid la bilaabatay muqararkii ugu horreeyay ee la diyaariyay bartamihii 1970-aadkii welina jirta. Inkasta oo dugsiyada dhexe buugtooda lagu magacaabay ‘Soomaali’, haddana casharrada ugu badani waxay ahaayeen suugaan u badan maansooyin, waxaa raacsanaa dhowr cashar oo sheeko ah, iyo dhowr curis ah. Marka dugsiga sare loo gudbo, maaddadu dhammaanteedba waxay isu rogtaa suugaan, waxaana loo bixiyay ‘suugaan’, oo qaybtii afkaba meel baa la iska dhigay.

Sida muuqata, waxaa jira dadaallo dambe oo u muuqda in dhaliishan lagu baraarugay, iskuna dayay inay wax ka qabtaan. Casharradii suugaanta waxay ku dareen casharro iyo layliyo ardayga ka dhisaya xirfadda qoraalka, magacii buugga dugsiga sare qaarkood waxay ka dhigeen *'Buugga Af-Soomaaliga'*. waa tallaabo jihada saxda ah loo qaaday oo bogaadin iyo ku dayashaba mudan. Welise dhaliishan muqararka way ku jirtaa, wax ku filanna lagama qaban, in baraarug bilowday ayaaba sad ah!

Waxaa xusid mudan in luqaddu leedahay laba laamood oo waaweyn, waa afka [language] iyo suugaantiisa [literature], mid walbana culuumtiisa ayaa ka farcanta. Waa laba laamood oo mataano ah kalase duwan, bariddoodudana waxay leedahay habab iyo xirfado kala duwan. Sidoo kale, baahida loo qabo barashadoodu way kala badan tahay.

Ardayga loo dhigayo luqadda, waa in mudnaanta la siiyaa barashada afka iyo afartiisa xirfadood ee dhegaysiga, hadalka, akhriska iyo qoraalka. Iyadoo baahida laga duulayo, suugaantu waxay gelaysaa kaalinta dambe.[iv]

Ardayga loo dhigayo afkiisa hooyo, waa in mudnaanta koowaad la siiyaa dhisidda labada xirfadood ee akhriska iyo qoraalka, lana kobciyaa kartidiisa curinta qoraalka toolmoon. Labada xirfadood ee kale, dhegaysiga iyo hadalka, wuxuu ka kasbaday hadal maalmeedkiisa iyo bulshada uu la falgelayo, sidaas darteed, baahida uu u qabaa way kooban tahay.[v]

Haddaba, sidaan horaba u tilmaannay, dheelli ayaa ka muuqda muqararka ardayda loo dhigo. Dhinaca suugaanta, gaar ahaan tixda ayuu u dheellisan yahay, weliba si aad ah ayuu ugu eexanayaa.

Yaan khalad loo fahmin, ujeedadeennu maaha in tix iyo gabayo aan ardayga loo dhigin. Tixdu waa inay saami kooban ku leedahay muqararka, qaybaha kalena waa inay saamigooda leeyihiin; guud ahaanna waa inay ku jaango`an yihiin baahida ardayga iyo sidii loo kobcin lahaa aqoontiisa iyo xirfaddiisa afeed, iyadoo da'diisa maanka lagu hayo.[vi]

Isku soo duuboo muqararka maaddada af Soomaaligu kama jawaabayo, kamana duulayo, baahida ardaygu u qabo in sare loo qaado xirfaddiisa qoraalka iyo akhrinta, macallinkuna mudnaanteeda ma siiyo. Ku darsoo, muqararka ayaa qeexaya dhinacyada ardayga laga dhisayo, isla markaana hagaya macallinka oo jihada u jeexaya. Sidaas darteed, qallooca iyo dheelliga ku jira muqararku wuxuu saamayn toos ah ku leeyahay shaqada macallinka. Si kasta oo macallinka Soomaaliga dhigayaa u dadaalo, marnaba ma toosin karo qallooca iyo dheelliga ku jira muqararka, mana baajin karo biyadayska ku jira dadaalkiisa.

Sidaas darteed, muddadaa dheer ee ardaygan loo soo dhigayay maaddada Af Soomaaligu ma dhalin inuu karti buuxda u yeesho akhriska iyo curinta iyo diyaarinta qoraal toolmoon oo habaysan, saa jihadaaba looma socone!

## 1. 2 Macallin aan la Diyaarin

Arrinka labaad waa macallinka dhiga maaddada Soomaaliga oo badiba aan la diyaarin.

Ugu horeynba, aan yara iftiimiyo aqoonta iyo xirfadda looga baahan yahay macallinka arday 'Soomaali' ah u dhigaya afkiisii hooyo oo ah af Soomaali. Si loo helo macallin ka soo dhalaala kaalinta loo igmaday ee baridda iyo barbaarinta ardayda, waa in macallinka lagu qalabeeyaa laba cilmi oo kala ah *'aqoonta maaddada uu dhigayo'* iyo *'xirfadda uu ardayga ugu gudbinayo'*. Macallinka Soomaaliga dhigaa, sida macallimiinta maaddooyinka kalaba, waa in laga diyaariyaa labadaa arrimood ee lafdhabarta u ah hawlgudashadiisa.

Waa tan hore e, waa inuu *'Af Soomaaliga iyo Suugaantiisa'* cilmi ahaan u barto. Haa, waa inuu cilmi ahaan u barto! Qofka Soomaaliyeed si fiican buu afkiisa hooyo u yaqaannaa, laakiin cilmi ahaan uma yaqaanno!! Way kala dhantaalan tahay macallinnimada qofka aan cilmi ahaan u aqoonin afku. Qof kasta oo Ingiriis ahi si fiican ayuu u yaqaannaa Ingiriisiga oo ah afkiisa hooyo, mase dhigo af Ingiriisiga; qof kasta oo Carab ahina ma dhigo af Carabiga. Ingiriisiga waxaa dhiga qof soo bartay *'English language & literature'*, Carabigana waxaa dhiga qof soo bartay 'اللغة العربية وآدابها'. Luqad kastaana waa sidaas. Cilmiga labaad ee macallinkani u baahan yahay waa in la baraa *'xirfadda baridda luqadda'*. In qof luqad la baraa waa xirfad leh hannaan iyo tabo la raaco; weliba baridda afka hooyo (luqadda koowaad) iyo baridda luqadda labaad (luqadda ajnabiga ah) waa laba farac oo leh tabo iyo hannaan, ilaa heer, kala duwan. Macallinka maaddada Soomaaliga u dhigaya ardayda Soomaaliyeed wuxuu u baahan yahay in la baro xirfadda baridda luqadda, gaar ahaan afka hooyo.

Labadan cilmi, *'cilmiga af Soomaaliga iyo suugaantiisa'* iyo *'cilmiga xirfadda baridda luqadda'*, waa labada baal ee uu ku duulayo macallinka ay tahay inuu dhigo maaddada af Soomaaligu; haddii midkood ka maqan yahay baal buu la`yahay, haddii labaduba ka maqan yihiinna labada baalba wuu la`yahay!!

Aan is weydiinno, xilligan intee ayuu macallinka maaddada af Soomaaligu ka haystaa labadaa aqoonood ee looga baahan yahay?

Guud ahaan, macallinka dhiga maaddada Soomaaliga, ma jiraan hay`ado waxbarasho oo takhasus ahaan soo diyaariya shaqada ka hor; ha noqdaan hay`ado heer jaamacadeed ah, ama diblooma ka sareeya dugsiga sare, oo lagu kordhiyo aqoontiisa af Soomaaliga, dhinacyada uu uga baahan yahay amaba xirfadda baridda luqadda.[vii]

Sidaas darteed, maaddada af Soomaaliga waxaa dhiga macallin aan loo soo diyaarinin, ha noqoto dhanka takhasuska cilmiyeed ama xirfadda waxbaridda. Daraasad aan sameeyay sannadkii 2015, macallimiinta aan sahaminta ku maray, waxaa cilmi ahaan ugu dhowaa maaddadan macallinka ku soo takhasusay afka Ingiriisiga, iyaguna waxay ahaayeen 10% keliya ee tirada macallimiinta ay sahamintu koobtay. Kuwo kale waxay ku soo takhasuseen fiisigis, xisaab, dhaqaalaha (economics), maamulka ganacsiga (bussiness adminstration) iwm. Halkaa, waxaa ka muuqata in badiba macallinka maaddadan dhigaa aanu aqoon cilmiyeed ka haysan luqadaha.

Haba noqoto luqad kale oo Ingiriisi ahe, keliya 10% ayaa luqadda cilmi ahaan u bartay; halka 90% kale ay barteen culuum kale oo ka durugsan luqadaha.

Dhinaca xirfadda, dhammaan macallimiinta sahamintu koobtay waxay ka sinnaayeen inaan haba yaraatee laga dhisin ‘xirfadda baridda luqadda’, sidoo kalena ayna helin tababbar xirfaddooda amaba aqoontooda sare loogu qaadayo intay maaddadan dhigayeen.

Maaddaama aanu jirin takhasuskii lagu xulan lahaa, markaan wareystay, macallinka maaddada af Soomaaliga waxyaabaha lagu xusho waxaa ka mid ah in uu hiwaayad ama hibo u leeyahay suugaanta Soomaalida, oo uu xiisaynayo. Macallimiinta qaarkoodna xiisado ka dhiman waajibkiisa shaqo ayaa loogu buuxiyaa maaddadan, qaarkoodna culaysyo kale ayaa la iskaga xalliyaa. Intaba, waxaa loogu qaatay macallinka suugaan jacaylka lagu soo xushay, isna wuxuu ardayda ugu dadaalaa sidii uu kurjad gabayo ah ardayga u xafidsiin lahaa, siiba dugsiyada dhexe iyo sare!

Dhinaca tababbarka, aad bay u yar yihiin (amaba ma jiro) tababbar ay helaan macallimiinta af Soomaaligu inta ay shaqada hayaan (in-service training) oo ku aadan aqoontooda af Soomaaliga iyo xirfadda dhigistiisa midna.[viii] Macallinku markuu muddo dhigo, oo yeesho waaya-aragnimo ilaa heer ah, waxaa la fili karaa inuu kororsanayo aqoontiisa af Soomaaliga iyo xirfadda uu ku gudbinayo labadaba. Taasina waxay kaabaysaa xirfaddiisa macallinnimo. Hase yeeshee, macallimiinta waaya-aragnimada leh way ku sii yaraanayaan dhigista af Soomaaliga. Macallimiinta sahamintu koobtay, 60% ka mid ahi waxay maaddadan dhigayeen muddo ka yar laba sanno, halka 17% keli ahi soo dhigayeen muddo gaaraysa shan sanno. Sababo dhowr ah awgood, ayay badiba macallimiintu aysan ugu raagin hawshan, oo mushaarku ka mid yahay. Dabcan, way jiraan tiro macallimiin kooban, oo farakutiris ah, oo muddo dheer maaddadan dhigayay, aqoontoodana dadaalkoodu dhisay, xirfaddoodana waaya-aragnimadoodu kobcisay. Waase yaraan la mid ah inayna jirinba!

Haddii buugga muqararku yahay mid haqabtiraya baahida ardayga, oo si dheelitiran loo soo diyaariyay, wuxuu kaabi lahaa macallinka iyo xirfaddiisa, wuxuuna asturi lahaa goldaloolaha ka dhalan kara macallinka aan hore loo soo diyaarin. Laakiin, sidaynu hore u soo tilmaannay muqararka ayaaba dhaliil xoog leh ku jirtaa.

**1. 3 Agab kala dhiman**

Dhaliisha saddexaad waa agabkii waxbarashada ee maaddadani u baahnayd oo kala dhiman, intooda yar ee laga hayaana wiiqan yihiin.

Buugga muqararka (text book) ee ardayga ka sokow; macallinku wuxuu u baahan yahay buugga tilmaame bare (teacher`s guidebook), iyo buugaag kale oo tixraac (reference books) u noqda; halka ardayguna u baahan yahay buugaag kale oo kaaba (supplementary reading books), oo uu akhristo, siiba dugsiyada dhexe iyo sare, oo kartidooda akhris-qoraal lagu kobciyo. Buugaagta ka sokow, waxaa kale oo loo baahan yahay agab kale oo hawshan loo adeegsan karo.

Buugaag iyo agab kaleba waxa keliya ee laga hayaa waa buugga muqathe, oo isna lagu diyaariyay hannaan-abbaarid kala dheellisan, qaarkoodna aad ku arkaysid khaladaad cilmiyeed looga han weynaa buug luqadeed arday loo dhigayo.[ix]

### 1.4 Isku soo wada Duub

Haddaba, natiijo intee le'eg ayaa laga sugi karaa dadaal kala wada dhantaalan. Muqararku wuu kala dhantaalan yahay, macallinkana way ku yar yihiin, ama way ka maqan yihiin, labada baal ee macallin kastaa ku duulo, oo ah aqoontii uu barayay iyo xirfadda uu ku gudbinayay. Macallinku si kasta oo uu u dadaalo ma buuxin karo dhaliisha muqararku leeyahay, taa cagsigeeda muqararka dheellisan ee maaddadu wuxuu wiiqayaa dadaal kasta oo macallinku la yimaaddo. Ku darsoo, agabkii macallinku uu u baahnaana way ka kala dhiman yihiin, oo ma jiro buug ah 'tilmaame bare' uu kaashadaa.

Sidaas darteed, inkasta oo waqti badan iyo kharash badan la geliyo in ardayga loo dhigo maaddada af Soomaaliga, haddana, waxaa ka soo baxa faa`iido kala dhantaalan, oo aad uga hoosaysa dadaalkaa la geliyay! Waa haan gunta ka daloosha.[x]

Waana taas ta inna hor taalla ee ah in arday muddo 12 sanno ah loo soo dhigayay maaddada af Soomaaligu, uusan karti buuxda u lahayn akhriska, curinta iyo diyaarinta qoraal toolmoon oo habaysan oo afkiisii hooyo ah. Haa, afkiisii hooyo qoraal kuma diyaarin karo, akhriskiisuna wuu la kufkufayaa, waayo lagama soo dhisin!

## 2. Dhabbaha Xalraadinta

Haddaba, sidee wax looga qabtaa dhaliilahan dadaalka wiiqaya?

Halkan, waxaan ku soo gudbinayaa talooyin kooban, oo kala ah:

### 2.1 Toosinta iyo Tayaynta Muqararka

Waa in la toosiyaa, lagana bi`iyaa dheelliga iyo kala dhantaalanka haysta maaddadan af Soomaaliga, lana saxo fikradda laga haysto iyo hannaan-abbaarka lagula falgalo. Waana in dib loo qaabeeyaa muqararka maaddadan, lana horumariyo buugga loo dhigayo ardayda, gaar ahaan heerka dugsiyada dhexe iyo sare.

Meelaha ay tahay in mudnaanta la siiyo waxaa ka mid ah in sare loo qaado xirfadda akhriska iyo qoraal-curinta ardayga, iyo suugaanta qaybteeda tiraabta, sida sheekooyinka iwm.

Si horumarin u qalanta muqararka maaddadani u helo, waa in guddiga diyaarinaya ay ku jiraan khubaro luqadaha cilmi ahaan u soo bartay (English ama Carabi), Soomaaligana u dhuundaloola, ayna weheliyaan khubaro waxbarashada ama tarbiyadda (education) soo bartay, intubana way joogaan. Haddiiba la heli karo khabiir isku soo bartay waxbarashada iyo luqadda 'language for education' waa sida ugu fiican.

Waxaa iyana lama huraan ah in buugga muqqrarka ee ardayga uu weheliyo buugga 'tilmaame bare' oo macallinku aad ugu baahan yahay. Waayo, buugga 'tilmaame bare' wuxuu hagaa macallinka, oo ka kaabaa iftiiminta dulucda casharrada, hannaanka cashar-gudbinta, qiimaynta ardayga iyo tilmaamaha kale ee uu ugu baahan yahay si uu kaalintiisa uga soo dhalaalo. Buuggani wuxuu wax ka tari lahaa diyaarinta iyo tababbarka macallinka ka dhiman. Sidaas darteed, waa inaan la dhayalsan baahida macallinku u qabo buugga 'tilmaame bare'.

Haddii la diyaariyo buugga muqararka oo tayo leh, uuna weheliyo buugga 'tilmaame bare', waxaan shaki lahayn in buuggu hagayo macallinka, ilaa heerna asturayo wixii xirfaddiisa ka gaasiran.

**2.2 Diyaarinta Macallinka**

In la diyaariyo, lana tayeeyo macallinka af Soomaaliga iyo suugaantiisa, loona sameeyo tababbar ah aqoontiisa af Soomaaliga iyo suugaantiisa, iyo xirfadda bariddiisa.

Muddada dhow, waxaa lagu bilaabi karaa tababbarro gaagaaban oo la siiyo macallimiinta wax dhigaya (in-service training). Waxaa habboon in tababbarradani noqdaan xidhmo taxane ah oo is kaabaya (training packages). Tababbarradani waxay, ilaa heer, wax ka tari karaan maqnaanshaha takhasuska af Soomaaliga.

Macallinka aynu ka hadlaynaa waa Soomaali afkiisa hooyo si fiican u yaqaan, sidaas darteed, tababbar gaaban oo la siiyo waxaa ka dhalan kara faa'iido baaxad leh. Afkiisii hooyo ee uu yaqaanay ayaa loo cilmiyaynayaa, woxogaa mabaadi'da cilmi-afeedkana loogu darayaa, loona raacinayaa tabihii iyo xeeladishii uu ardayga karaankiisa luqadeed 'language proficiency' u kobcin lahaa.

Muddada dhexe, waa in la hiigsadaa sidii loo hirgelin lahaa macallin leh takhasus iyo xirfad buuxda, heer diblooma ama digrii buuxa. Waxaa lagu lammaanin karaa digrii luqad kale, sida English ama Carabi. Qodobkani wuxuu u baahan yahay darsid iyo lafagurid dheeraad ah.

**2.3. Kordhinta Agabka Waxbarashada**

Waa in la diyaariyo buugaag kaaba (supplementary reading books) oo barbar socda buugga muqararka, oo ardaydu akhrisato, siiba dugsiyada dhexe iyo sare, waana buugaag sheekooyin iyo aqoon guudba noqon kara. Buugaagtani, waxay xoojinayaan aqoonta iyo xirfadda afeed ee ardaygu u leeyahay afkiisa hooyo. Buugaagta daabacan ee suuqa yaalla ayaa laga xulan karaa kuwo tayo leh, oo ujeeddada oofinaya, deedna lagu lammaanin karaa buugga muqararka.

Sidoo kale, waa in loo hawlgalaa sidii loo haqabtiri lahaa agabka waxbarashada ee maaddadani u baahan tahay. Macallinka is xilsaaraa wuxuu diyaarsan karaa agab waxbarasho waxtar leh, waayo, ma yara agabka uu agagaarkiisa uu ka heli karo, wax weyna ku soo kordhin kara hawshiisa.

## 3. Gabagebo

Si dadaalka la geliyo baridda af Soomaaligu u dhalo faa`iido iyo natiijo looga qaateen ah, waa in la saxaa dhaliilaha jira, waxaana taa lagu gaari karaa talooyinka kor ku xusan.

Tallaabada ugu horeysa, uguna muhiimsan, markiibana la fulin karo, waa in la diyaariyo buugga muqararka oo tayo leh, ayna diyaariyaan khubaro aqoontooda iyo waaya-aragnimadooda lagu soo xulay. Waxaan shaki lahayn in buuggani uu hagayo macallinka, asturayana wixii xirfaddiisa ka gaasiran.

Mustafa Fayruus
Email: mustafasom@hotmail.com

---

*Mustafa Fayruus waa bare jaamacadeed, cilmibaare iyo xeeldheere cilmi-afeedka 'linguistics'; qayb ka ahaa diyaarinta qaamuuskii 'Soo Maal – Qaamuus Af Soomaali', 2013 Jabuuti; ka tirsan Machadka Daraasaadka Soomaaliyeed (Institute for Somali Studies – ISOS), Akadeemiye Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) iyo African Academy of Languages (ACALAN).*